Oregon Health Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

# Su’aalaha Badanaa la Iswaydiiyo (FAQ-yada) ee Hagitaanka Dib u Furidda Marxaladda Koowaad iyo Marxaladda Labaad Barkadaha Dabbaasha ee Liisanka Haysta, Barkadaha Biyaha Diirran iyo Garoomada Ciyaaraha Taniska ee Liisanka Haysta *(la cusboonaysiiyey 9-14-2020)*

Hoos waxa ku qoran su’aalaha badanaa la iska waydiiyo Hagitaanka Dib u Furidda Marxaladda Koowaad iyo Marxaladda Labaad – Barkadaha Dabbaasha ee Liisanka Haysta, Barkadaha Biyaha Diirran iyo Garoomada Ciyaaraha Taniska ee Liisanka Haysta (**Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta**). OHA waxay bixisaa Su’aalahan Badanaa la Isweydiiyo (FAQ), waxayna si aan joogta aheyn u cusbooneysiin kartaa Su’aalaha Badanaa la Isweydiiyo (FAQ), si ay ugu caawiso bulshada inay fahamto hagista, si ay uga jawaabto su’aalaha daneeyeyaasha, iyo si ay u xaqiijiso sida hagista u quseyn karto xaaladaha gaarka ah. FAQ-yadaan looguma talagelin inay galaan booska hagida, laakin waxaa loogu talagalay inay fasiraan, kabaan, oo gacan ka geystaan buuxinta faahfaahinta hagida.

## Barkadaha Dabaasha ee Shatiyeysan

**S1: Barkadeenu waa ay yar tahay, oo waa u qaas keliya xubnaha waxaana xubinimada ay ku xadidan tahay 35 qoys. Ma jiro naf-badbaadiye/badmaax goobta ku sugan waxayna shaqaalahayaga dayactirka ka kooban yihin maareeye iyo shaqaale, kuwaasi oo dhammaantood ah xubne ka tirsan barkadda. Xaaladdayada, ma awoodi karnaa in xubnahayaga sii wada joogaan haddii aan u hogaansano tilmaamaha kala fogaanshaha jireed oo aan isku qoondeeyno waajibaad si aan ula socono tilmaamahan inta la joogo barkadda?**

J1: Maya. Tilmaamaha waxay u baahan yihiin in uu jiro kormeere la soconayo ka fogaanshaha jireed haddii barkada dib loo furayo inta lagu jiro Marxalada/Wajiga 2-aad. Tani waxay ka dhigan tahay in loo baahan yahay inuu jiro shakhsi mas'uul ka ah xaqiijinta u hogaansanaanta shuruudaha kala fogaanshaha jireed. Shaqaale ama tabaruce ayaa loo xil saari karaa inuu noqdo kormeeraha kala fogaanshaha jireed waana in loo xilsaaraa inta lagu jiro muddada barkada la isticmaalayo. Howlwadeenada barkada ayaa go’aansan karo sida kormeerayaasha loo xilsaaro.

**S2: Miyay barkadda leh isticmaalka xadidan ka furmi kartaa ururkayaga mulkiilayaasha guryaha?**

J2: Haa, barkadda waa la oggol yahay in la furo iyadoo la raacaya Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta.

**S3: Casharrada dabaasha ma laga oggol yahay xarumaha barkadda?**

J3: Haa, casharada dabaasha waa la oggol yahay waana inay raacaan Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta.

**S4: Kawaran haddii uu naf-badbaadiyuhu diido inuu sameeyo CPR (riicida wadnaha si neefsashada dib loogu soo celiyo) ka baqida infekshinka COVID-19 awgeed?**

J4: Hawlwadeenada barkadaha dabaasha waa inay xaqiijiyaan in qatarta ku jirta ka shaqeynta barkadda loo sheego dhammaan shaqaalaha ka hor inta aan dib loo furin. Sidaa awgeed, barkadda dabaasha waa inaan dib loo furin iyada oo aan la ogayn in naf-badbaadiyeyaasha ay diyaar u yihiin gudashada waajibaadyadooda oo dhan. Tilmaamaha Red Cross ee sharaxayo baahida loo qabo qalabka is-ilaalinta shakhsiyadeed (PPE) inta lagu jiro CPR ayaa la heli karaa. Xarumaha waxay u baahanyihiin inay PPE haboon siiyaan naf-badbaadiyeyaasha.

**S5: Waxaan xubin ka ahay guddiga ururka milkiilayaasha guryaha. Ururkayagu malaha shaqaale joogto ah. Ma loo baahan yahay inuu jiro Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed oo barkadda xaadir ku ah had iyo jeer ama ma waxaan dhejin karnaa calaamadaha kala fogaanshaha jireed haddii kormeere aan la heli karin?**

J5: Barkad kasta oo shatiyeysan oo doorata in la furo waxaa looga baahan yahay inay lahaato Kormeeraha Kala Fogaanshaha jireed oo calaamado la dhejiyaana bedel uma noqon karaan kormeeraha. Tabaruce ayaa laga yaabaa inuu guto waajibaadyadan waxaana lagu talinayaa in calaamadaha kala fogaanshaha jireed lagu dhejiyo barkadda si tabarucayaasha loo ogeeysiiyo shuruudaha kala fogaanshaha jireed. Xarunta shatiyeysan ayaa kama dambeyntii mas'uul ka ah haddii dhaqan galinta ay lama huraan noqoto.

**S6: Miyuu Kormeeraha Kala fogaanshaha Jireed noqon karaa tabaruce?**

J6: Haa. Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta ma qeexayso cida ciyaari karto doorka Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed. Si kastaba ha noqotee, tabarucaha waa inuu awoodo inuu guto waajibaadyada ku taxan hagida si loo xaqiijiyo in martida barkadu ay kala fogaadaan masaafo lix (6) fuud ah, oo ay ku jiraan marka la joogo iridaha laga soo galo, iridaha laga baxo, musqulaha, aagga barkadda, iyo aag kastoo kale oo ay dadku isugu imaan karaan. Tabaruce ayaa gudan kara waajibaadyadan, laakiin xarunta shatiyeysan ayaa kama dambeyntii mas'uul ka ah haddii dhaqan galinta ay lama huraan noqoto.

**S7: Markuu kormeeraha Kala Fogaanshaha jireed ku jiro "shaqada", miyay mas’uuliyadiisu tahay kaliya inuu la socda uuna jogteeyo in masaafo u dhaxayso martida barkadda markay joogaan gudaha iyo agagaarka barkadda?**

J7: Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed wuxuu mas'uul ka yahay xaqiijinta in masaafo lix (6) fuud ah u dhaxeeysa martida, marka la joogo iridaha laga soo galo, iridaha laga baxo, musqulaha, sagxadaha barkadaha, iyo aag kasta oo dadku ku kulmi karaan. Qofkaan wuxuu noqon karaa shaqaale ama tabaruce uu xilsaaray howlwadeenka barkada.

**S8: Xaruntu ma yeelan kartaa Kormeerayaasha Kala Fogaanshaha Jireed oo badan?**

J8: Haa, xarumaha waxay dooran karaan inay lahaadaan tirada kormeerayaasha kala fogaanshaha jireed oo ay u arkaan inay lagama maarmaan u tahay si ay u abuuraan jawi baadqab ah ayna u hubiyaan in Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta la raaco.

**S9: Miyaa Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed looga baahan doonaa inuu xirto maaskaro?**

J9: Haa, kormeeraha kala fogaanshaha jireed waxa khasab ku ah inuu xirto maaskaro, waji dabool ama gaashaan waji. Maaskarada, waji daboolka ama gaashaanka wajiga waxa kaliya la iska bixin karaa marka la afuufayo firiimbig ama marka biyaha lagu jiro.

**S10: Haddii barkad bulsheed ay leedahay xaashi is-qoritaan oo lagu jadwaleeyo waqtiyada, iyo haddii hal qoys/kooc oo keliya ay isticmaali karaan barkadda wakhtigaas, barkadda miyay u baahan doontaa Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed?**

J10: Maya. Barkad kasta oo shatiyeysan oo doorata in la furo waxaa looga baahan yahay inay lahaato Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed oo ay xilsaareen barkada shatiyeysan haddii wax ka badan hal qoys/koox ay isticmaalayan barkada isku waqto.

**S11: Ma heli karnaa in qoys kasta oo ka tirsan dhismahayaga uu kooxdiiba u xilsaaro qof weyn oo u noqon doona Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed inta qoyskoodu joogo barkadda?**

J11: Haa. Barkad walboo shatiyeysan ama xarunta barkada biyaha diiran waxay u baahantahay inay xilsaarto Kormeeraha Kala fogaanshaha Jireed, kaasi oo noqon kara tabaruce ama shaqaale, si loo hubiyo in sharuudaha kala fogaanshaha jireed laga joogteeyo dhammaan aagaga xarunta ee dadka isugu imaan karaan. Kormeerahaan waxaa xilsaari karo qoyska/reerka markii ay isticmaalayaan barkada waxayna midaas u sheegi karaan howlwadeenka barkada ee dhismaha. Calaamadaha kala fogaanshaha jireed ayaa lagula talinayaa in lagu dhejiyo barkadda si loogu wargeliyo shaqaalaha, tabaruceyaasha, iyo martida shuruudaha kala fogaanshaha jireed.

**S12: Maaddaama carruurta 14 jirka ah loo oggol yahay inay si madax-bannaan u dabaashaan, miyay laftooda xaqiijin karaan inay ka fogaadaan dadka kale?**

J12: Maya. Barkad walboo shatiyeysan ama xarunta barkada biyaha diiran waxay u baahan tahay inay xilsaaraan Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed oo ugu

yaraan 18 sanno jir ah si loo hubiyo in sharuudaha ka fogaanshaha jireed la joogteeynayo.

**S13: Waxaa jirta tirada ugu badan ee dadka ee la oggol yahay inay wada joogaan aagg. Sidee ayay tani u shaqaysaa haddii qoysku si wada-jir ah loo wada kooxayn karo iyadoo shakhsiyaadku u dhaxeeyso in ka yar lix (6) fuud?**

J13: Tixraaca hagida ku jira oo ah in qof kasta keligii ku sugnaado aag ah 35 fuud ayaa loo bixiyay tixraac ahaan si looga caawiyo xarumaha inay go'aamiyaan inta shaqsi ee si baadqab ah u wada geli karo qolka labiska iyagoo joogteynayo kala fogaanshaha masaafo lix (6) fuud ah. Xubnaha isku kooxda ah waxay midka midka kale ka fogaan karaan in kar yar lix (6) fuud, sidaa darteed cabirka aagga ma noqon kara arrin quseeysa kooxda isla waqti kujira qolka labiska. Tani waxay arin noqon kartaa keliya haddii shakhsiyaad aan ka tirsanayn qoyska iyaguna ay galaan qolka labiska isla waqtigaas.

**S14: Ma jiraan tilmaamo gaar ah oo loogu talagalay inta jeer ee aan nadiifinayno?**

J14: Maya. Inta jeer ee nadiifinta la sameynayo waxay ku xirnaaneysaa kala duwanaanshaha xaqiiqaha, oo ay ku jiraan inta jeer ee aaga la isticmaalayo, tirada shaqsiyaadka taabanayo sagxad gaar ah, nooca sagxada, iwm. Xarumaha waxay u baahan doonaan inay go'aamiyaan inta jeer ee la nadiifinayo sagxadaha si loo hubiyo inay ilaaliyayaashoodu baadqab ahaadaan. Wixii sharuudaha ku saabsan nadiifinta iyo jeermisdilka, barkadaha waa inay raacaan Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta.

**S16: Naf-badbaadiyaha ma u baahan yahay inuu xirto waji dabool?**

J16: Haa. Si kastaba ha noqotee, naf-badbaadiyaha ayaa u baahan doona inuu iska bixiyo waji daboolka si uu u afuufo firimbiga ama ka hor inta uusan u gelin barkadda shaqada naf-badbaadinta.

**S17: Sidee bay barayaasha dabbaasha u joogteyn doonaan kala fogaanshaha jireed markay ilmaha yaryar barayaan sida loo dabaasho?**

J17: Suuragal maahan in la joogteeyo tilmaamaha kala fogaanshaha jireed marka carruurta wax la barayo. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in baaritaano/ogaansho caafimaad lagu sameeyo dhammaan barayaasha laguna laasimo barayaasha inay ku dhaqmaan nadaafad caafimaad leh maalin kasta iyagoo raacaya Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta.

**S18: Haddii lix (6) fuud oo kala fogaansho jireed ah la joogteeyo, miyay kooxaha dabbaasha kaqaybqaadan karaan nashaadyo isku waqti ah haddii ku dabaalka hal wadiiqo la adeegsado?**

J18: Haa, haddii kala fogaanshaha jireed marwalba laga joogteeyo gudaha barkadda ama aaggaga ku sugida. OHA waxay talinaysa in nashaadyada kala duwan ay dhacaan waqtiyo kala duwan si looga fogaado in barkadda nashaadyo badan loogu adeegsado isla waqti loogana fogaado isu imaadka dad badan, laakiin shardi ma aha.

**S19: Haddii aan joogteyn karno masaafo kala fogaansho oo lix (6) fuud ah, miyay dabaalyahano badan ka qaybqaadan karaan barkadda isla hal wakhti?**

J19: Haa. Hagayaasha waxa looga baahan yahay inay dejiyaan habab ay haad/dariiq wadaagayaashu iskugu jirsiinayaan ugu yaraan lix (6) fuud, marka laga reebo xaaladda marka haad wadaagayaashu ay iska hor imanayaan oo midba dhinaca ka kale ka yimi u socdo. Hagayaashu waa inay mamnuucaan macaamilka dhex maraya dabbaalyahanada haadadka isku xiga ayna diidaan in dabbaalyahanada ku kulmaan dhammaadka haadadka. Dabbaalyahanadu waa inay ka soo galaan barkadda dhinaca kana baxaan dhinaca kale ayna joogteeyaan kala fogaansho lixa (6) fuud ah ee iyaga u dhexeeya. Isu uruurka dabbaalyahanada ayaa aad loo mamnuucay; aagg sugitaan oo loogu talogalay oo saamaxaya kala fogaanshaha jireed ee lixda (6) fuud ayaa loo baahan yahay. Hawlwadeenadu waxa khasab ku ah inay u xilsaaraan kormeeraha kala fogaanshaha jireed dhammaan saacadaha shaqadu socoto.

**S20: Miyaa xubnaha isku kooxda dabbaashu la mid yihiin xubnaha isku qoyska ah ee isku jirsan kara wax ka yar lix (6) fuud?**

J20: Maya. Kaliya xubnaha isku qoyska ka tirsan ayaa isku jirsan kara wax ka yar lix (6) fuud.

**S21: Miyaa barkadaha dabbaasha ee leh isticmaalka xadidan looga baahan doonaa inay lahaadaan Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed oo dul jooga sagxada barkadda markay barkadda furan tahay? Miyay kala socon karaan kamarad oo ay ka maqnaan karaan sagxada barkadda?**

J21: Kormeeraha Kala Fogaanshaha Jireed ayaa looga baahan yahay xarun kasta, laakiin kormeeruhu uma baahna inuu dul joogo sagxadda barkadda waqti kasta. Fiiri Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta.

**S23: Miyaa hawlwadeenada barkadaha looga baahan yahay inay barxad ku lahaadan rakada barkadda si ay u ilaaliyaan kala fogaanshaha jireed ee dabbaalyahanda ku daabaalanayo haadka?**

J23: Haa. Hawlwadeenada barkaduhu waxa khasab ku ah inay dabbaalyahanada u sameeyaan aagg sugitaan kaasi oo u saamaxaya inay kala fogaadaan lix (6) fuud.

**S24: Miyaa qolalka dhar beddelashada ee halka qofka loogu talagalay loo txigelinayaa inay yihiin qolalka labiska?**

J24: Maya. Haddii qolka dhar badelashada loogu tallogalay hal qof, waa in wax ka badan hal qof uusan isticmaalaan qolka wakhtigiiba, inay yihiin xubno katirsan isku koox mooyee.

**S25: Miyaa howlwadeenada barkada loo ogolyahay inay isku imaansho yar (tusaale, xafladaha dhalashada) ku qabtaan aagga barkadooda? Haddii ay sidaas tahay, waa maxay hagida xadeynta cabirka kooxda?**

J25: Haa. Hawlwadeenada barkadaha ee degmooyinka kujira Marxladda Koowaad waxa khasab ku ah inay raacaan Hagitaanka OHA ee Isku-imaatinada, Kulamada Bulshada ee Gudaha ah si loo go'aamiyo xadka tirada dadka xaflada imaan kara.

Hawlwadeenada barkadaha ku yaala degmooyinka kujira Marxalada/Wajiga Labaad waxay raaci karaan hagista Wajiga Labaad ee Madasha iyo Munaasabadaha.

**S27: Miyaa biya iska tuurada ku yaalo barkadaha la ogolyahay in la furo?**

J27: Haa, si kastaba ha noqotee, howlwadeenada waa inaysan ogolaan iskugu imaadka goobta biyo isku tuurka ama meel u dhow goobta biyo isku tuurka waana inay xaqiijiyaan in sharuudaha kala fogaanshaha jireed la joogteeyaa marwalba.

**S28: Miyaa fasalada dabbaasha badbaadada ee carruurta la oggol yahay?**

J28: Haa. Suuragal maahan in la joogteeyo tilmaamaha kala fogaanshaha jireed marka la bixinayo fasalada dabbaasha badbaadada. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in baaritaano caafimaad lagu sameeyo dhammaan barayaasha laguna laasimo barayaasha inay ku dhaqmaan nadaafad caafimaad leh maalin kasta iyagoo raacaya Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta.

**S29: Waxay u badan tahay in bareyaasha dabaasha ay u dhawaaan doonaan ardayda. Miyuu hal ah baraha dabaasha la shaqeyn karaa "qeybo qoys" oo badan ama fasalada dabaasha maalinta oo dhan?**

J29: Haa. Macalimiinta dabaasha ee la macaamilayo fasalada dabaasha oo badan waa inay xirtaan maaskaro, daboolka wajiga ama gaashaanka wajiga markii aysan ku jirin barkada waana inay dhaqaan/jeermisdilaan gacmahooda inta u dhaxeyso la macaamilka kooxyada kala duwan.

**S30: Haddii aan dooranno inaan furno qolkayaga labbiska, miyay dadka dabaalanayo isticmaali karaan qubeyska qolka labbiska?**

J30: Haa. Hawlwadeenada barkadaha ayaa oggolaan kara isticmaalka qubeyska qolka labbiska. Qubeysyada waxa khasab ah in si joogto ah loo nadiifiyo iyadoo la raacayo Hagitaanka OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Taniska.

## Barkadaha Biyaha Diiraan ee Shatiyeysan

**S1: Waxaan leenahay barkad dabiibin oo ku taalo gudaha goobta jimicsiga/jiimka. Ma furi karnaa barkadda dabiibinta?**

J1: Haa. Haddii goobta jimicsigu ku taalo degmo loo oggolaaday Marxaladda Koowaad ama Marxaladda Labaad, barkadda dabiibinta ayaa loo oggol yahay in la furo iyadoo la raacayo Hagida OHA ee Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta.

**S2: Haddii goob jimicsi/jiim ama xarun jimicsi ay leedahay aagg daliig oo ballaaran (tusaale ahaan, 12 fuud x 12 fuud) oo saamixi kara kala fogaansho jireed oo u dhaxeeya kooxyo badan, miyay wali u baahan yihiin inay u hoggaansamaan sharciga 1 qof / qoys waqtigiiba?**

J2: Dhammaan barkadaha biyaha diiran (barkadaha daliiga) waxay u baahan doonaan inay isticmaalka barkadda ku xaddidaan hal qoys waqtigiiba iyadoon loo

eegayn cabbirka barkadda. Hawlwadeenadu waxay isku dayi karaan ku muddaynta boos haynta qaab 15 daqiiqo ka dhib ah.

**S3: Waqtigiiba inay hal qoys kujiraan barkada diiran – miyuu micnaheedu yahay haddii aysan dadku ka  tirsanayn isla hal qoys, in kaliya hal (1) qof oo ku jiro barkada diiran waqtigiiba?**

J3: Haa.

**S4: Miyay qolalka biyaha kulul shaqeyn karaan haddii howlwadeenada raacaan sharuudaha kala fogaanshaha iyo nadiifinta ee kujira hagida barkadaha?**

J4: Maya. Qolalka biyaha kulul iyo qolalka uumiga way xiran yihiin waqti xaadirkan mana shaqeyn karaan.

**Helitaanka dukumiintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.